
# GUDAHA



***Qolka Fadhiga*** waa qayb ka tirsan asalka guryo qori ah, oo lagu arki karo gidaarada. Marka lagu daro "daaqadaha runta" ee muujinaya guryaha qoriga ah. Illaa 1850-meeyadii, keliya qolkan iyo ka sare ayaa jiray! Waxay muujinayaan nolosha Galbeedka Missouri iyo waxyaabaha laga heli karay guriga hurdada ee xilligaas.



***Qolka cuntada*** waxa lagu soo daray 1890-meeyadii taas oo ka dhigtay qaybta labaad ee ugu wayn ee guriga lagu soo daray.
Maanta, wuxu muujinayaa agabkii waqtigaa laga heli jiray goobaha cuntada ee rasmiga ah sida miiska, boodhada dacalka, iyo qalab asal ah oo ay lahaayeen qoyska Atkins sida saacad iyo macdan qalina.



***Labada Barandho***waa qolal yaryar oo ku yaalla dhabarka guriga, midba dhiniciisa. Waxay asal ahaan ahaayeen barandhooyin furan, balse markii dambe waa la xiray oo guri ayaa laga dhigay. Barandhada bari, waxaad ka daawan kartaa bandhig asaartii hore ee matxafka, halka barandhada galbeedna lagu soo bandhigo qalabyo kala duwan oo guryaha lagu nadiifin jiray waqtiyadii hore.



Qolka ***Dukaanka Hadiyadaha*** wuxuu markii hore ahaa jikada ugu horreysa ee gudaha guriga lagu daray. Waxaa suuragal ah inuu jiray illaa berigii ay hoyga degenaayeen qoyska Johnson, inkastoo qolka laftiisu laga yaabo in lagu daray isla waqtigaas oo uu la mid yahay Qolka Cunada ee 1890-meeyadii la soo kodhiyay. Maanta, qolkaasi waxaa loo isticmaalaa dukaanka hadiyadaha ahaan, qayb ahaan sababtoo ah xaaladdii uu ku jiray markii lala wareegay.




***Qolka Bandhigga*** waxaa lagu daray guriga sannadkii 1853, waxaana gudaha looga sameeyay tuubada qiiqa qaadda. Markii qoyska Atkins ku dareen qolkaan, ayay sidoo kale ku dareen qolka ka sarreeya, jidadka gudaha guriga, iyo alwaaxda cad ee gidaarka. Qolkaas waxaa markii hore loo sameeyay qol fadhi ahaan, kadibna waxa loo beddelay qol jiif oo musqusha gudaha ku leh, hadda-na waxaa loo isticmaalaa bandhigyada madxafka ee wareega.



***Qollaalka sare*** ee gurigu waa laba qol oo labadooduba loo isticmaalo qolal jiif ahaan. Dhinaca galbeed, waxaad ka arki kartaa bandhig qol jiif ah oo leh alaabooyin waqtiyadii hore lagu isticmaali jiray. Qolka dibaddiisa waxa lagu soo bandhigaa Xabaalaha iyo Kaniisadda Big Shoal. Qolka jiifka bari waxaa loo beddelay bakhaar, mana u furana dadweynaha in ay booqdaan.

# DHISMAHA

## HEIRLOOM GARDEN

Tabarucayaasha Master Gardeners' ayaa kaashaday Beerta iyo Madxafka Atkins-Johnson si ay u qorsheeyaan, u beeraan, una ilaaliyaan beer ku fadhida 3600 oo labajibaaran oo khudaar, dhir daaweed, iyo ubaxyo qaddiimi ah. Dhammaan dhirtu waa noocyo la beeran jiray ka hor 1900-kii. Intaas waxa dheer, beerta qaddiimiga ah waxa ku yaalla rako-beereed kacsan oo ay ku yaallaan dhir daaweed, istarawbari, asberjoos, iyo dhiro kale.

## BEERTA SHINIDA EE BIG SHOAL

Laba beer shiniyeed ayaa loo soo raray aagga Beerta Big Shoal sannadkii 2014. Shinidu waxay jeceshahay beerta, oo waxsoosaarka malabkuna taas buu ka turjumayaa! Malabka waxa lala baxaa laba jeer sannadkii (Juun iyo Agoosto). Malabka la soo saaro dayrta ayaa ku filan inuu quudiyo shinada xilliga jilaalka. Shaqaalaha Magaalada iyo dad tabarucayaal ah ayaa dhalooyin ku shuba oo calaamadiya malabka si loogu iibiyo dukaanka madxafkeena.

## BEERTA BIG SHOAL

Beertu waxay soo saartaa xasiisad, gabbaldaye, iyo bocor shacabka laga iibiyo waxayna ku beertaa dhul beereed todobo akar ah. Waa mashruuc isugu jira dakhli uruurin, xiriir dadwayne iyo waxbarshada beeraha. Beerta Big Shoal waa dadaal ay iska kaashadeen Magaalada Gladstone iyo Asxaabta Atkison-Johnson. Beerta iyo Madxafka.

## XABAALAHA BIG SHOAL

Xabaalaha Big Shoal waxa la sameeyay 1824 waxana loo sameeyay dadkii iman jiray kaniisadda Primitive Baptist Church ee meesha ka dhawayd. Dhulka waxa ku deeqay qoysaska Hightower iyo Atkins. Waa halkii lagu aasay xubno badan oo qoyska Atkins ah, dadkii hore ee degenaan jiray Degmada Clay, iyo halyeeyada (Dagaalkii Sokeeye ee 1812, iyo Dagaaladii Hindida ee Blackhowk)

**Waad ku mahdsan tahay booqashadaada! Haddii aadan qorshaynayn inaad sii hayso buug-yarahan, fadlan kusoo celi miiska hore.**

# Atkins-Johnson Beerta iyo Madxafka

GLADSTONE, MISSOURI



Beerta iyo Madxafka Atkins-Johnson waa mid ka mid ah beeraha ugu qaddiimisan Degmada Clay, Missouri. Isagoo markii hore ka sameysnaa alwaax, gurigan iyo dhul beereedka fidsan ee ku hareeraysan waxa loo aqoonsan yahay inuu yahay kuwa ugu da'da wayn ee si joogto ah loo degenaa.

ATKINS-JOHNSON FARM AND MUSEUM
GLADSTONE, MISSOURI

Freedom's Frontier NATIONAL HERITAGE AREA

## Beerta iyo Madxafka Atkins-Johnson waxay sheegayaan sheekada nolosha beeralaysa iyo reer galbeedka ku soo fiday Missouri iyadoo laga dheehanayo sheekooyinka guryaha iyo qoysaskii mar ku noolaa halkan.

# TAARIIKHDA BEERTA 1824-2013

- 1824 - Juun 1, Dhulka waxa Bixisay Degmada William Allen of Howard , Missouri for 80 akar.
- 1831 - Agosto 9, William iyo Rachel ayaa ka iibiyay John Hightower 130 oo akar kana siiya $400.
- 1831 -1834 - Guri alwaaxa ayaa goobta laga dhisay
- 1834 - Diiseembar 19, John & Polly Hightower ayaa ka iibiyay Johnathan Q.Atkins kana siiyay $620
- 1853 - Johnathan Atkins ayaa dhismo wayn oo guriga ku soo kordhiyay labanlaab in ka badan ku sooo dareen guriga.
- 1880-meeyadii-1890-meeyadii - Qayb dambe ayaa lagu daray guriga, oo isugu jirta baradhooyin iyo qol cunto.
- 1904 - Febraayo 13, Mary, Jonathan, & Fannie Atkins iyo John & Estelle Stone ayaa ka iibiyay Rudolph Schroeder kana siiyay $7,605
- 1920 - Agoosto 24, Rudolph & Annie Schroeder ayaa ka iibiyay Mary Johnson kana siiyay $21,175
- 1920s - Koronto ayaa la soo geliyay guriga beerta. Jiko ayaa sidoo kale lagu soo kordhiyay.
- 1950s - Nidaamka gaasta dabiiciga ah ayaa lagu rakibay.
- 1952 - Magaalada Gladstone, Missouri ayaa laga dhigay meelganacsi, oo ay ku jiraan guriga iyo qayb ka mid ah Beerta Johnson.
- 1964 - Tuumbooyin biyo ayaa la soo geliyay qollaalka hoose waxana loo geliyay Louise Johnson, oo sarriir yaala ahayd qabtayna kansar.
- 1976 - Guriga waxa loo aqoonsaday Astaan Taariikhiya oo Degmada Clay leedahay
- 1991 - Ellen Johnson ayaa ku dhintay guriga wuxuna ahaa xubintii qoyska Johnson ee u dambeysay ee guriga degta.
- 2004 - Kiraystihii u dambeeyay iyo qofkii gaarka ahaa ee degenaa ee u dambeeyay ayaa guuray.
- 2005 - Iyagoo la shaqeynay Lena Johnson, Magaalada Gladstone ayaa la waregtay guriga iyo qayb dhismaha si ay u ilaaliyaan taarikhdiisa.
- 2007 - Noofeembar 4, Guriga waxa lagu daray Liiska Diiwaanka Goobaha Taariikhiga ah ee Waddanka.
- 2008 - Shaqo dib u soo celin ah ayaa ka bilaabantay beerta. Waxay socotay illaa 2012.
- 2009 - Juun, Magaalada Gladstone ayaa la wareegtay xabaalaha Big Shoal ee la iskaga tagay iyada oo loo maray Xeer-ilaaliyaha Guud ee Missouri.
- 2013 - Abriil 27, Beerta iyo Madxafka Atkins -Johnson ayaa shacabka loo furay.

## Qoyska Atkins

Qoyska Atkins waxay dhismaha u isticmaali jireen ganacsiyo badan, una badnaa beer. Xogta qoran waxay sheegaysaa inay beeran jireen sarreen, galley, boorash, digir iyo misir, baradhada macaan iyo ta Ayrishka, caws, iyo dhiro kale. Qoysku waxay sidoo kale dhaqan jireen xoolo waxayna lahaayeen baqalo, fardo, lo', ido, iyo doofaarro.

Marka laga yimaado beeraha, qoysku waxay sidoo kale sameyn jireen ganacsiyo kale. Dhismuhu wuxu caan ku ahaa soosaarista suufka, dukaan tumaal oo shaqeyn jiray, mishiin wax ridqa, iyo meel lagu dayactiro baabuurta fardaha xilliyada 1800-meeyadii.

## Qoyska Schroeder

Reer Schroeder waxay ahaayeen beeralay yaryar. Waxay beer kale ku lahaayeen Waqooyiga Magaalada Kansas halkaas oo ay ku beeri jireen khudaar ay ku gadi jireen Suuqa Magaalada. Diiwaanadu ma cadda in beertani ahayd goob dheeri ah oo ay wax ku beertaan iyo in loo kirayn jiray hanti maalgashi ahaan.

## Qoyska Johnson

Qoyska Johnson, sida Schroeders, waxay ahaayeen beeralay yaryar, waxayna lahaayeen dhul kale oo loo isticmaalay beerasho. Dhulkoodu wuxu u dhowaa Birmingham, Missouri waxa loo adeegsan jiray dalaga, halkan beertan inta badan loo isticmaali jiray xanaanaynta xoolaha. Johnson waxay lahaayeen lo' caaneed, lo' hilibeed, iyo doofaarro. Laba ka mid ah wiilasha Mary iyo John Johnson ayaa sii watay ganacsiga beeraha noloshooda oo dhan. Ka dib markay dhinteen, dhulkii waxa laga kireeyay beeralay caws ka beerata illaa laga iibiyay Magaalada Gladstone.